

## Gurbood (1 iyo 2 sano jir)

### Asalka Qoraalka

#### Carruurta da'daan ahi waa mashquul, doonaya inay wax walba ogaadaan oo aad u firfircoon!

Sanad guuradooda 1aad, carruurta badankeed waxay bartaan inay socdaan. Bisha ku xigta, waxay baran doonaan inay ordaan oo fuulaan, furaana albaabka khaanadaha, iyo dhalooyinka. Tan macneheedu waxa weeye in gurboodkaaga yaryari inay hadda samaynkaraan waxyaallo aanay gaari karin.

Gurboodka yaryari ma xasuustaan inay fahmaan ama xasuustaan khatarta. U kormeer ilmahaaga si degan. Gurigaaga uga dhig meel amaana isaga oo ay sahamin ku samayn karto.

Gurboodku waxay u baahan yihiin difaac gaar ah oo::

- Sumawga
- Qarqida
- Ku mergashada walxa yaryar
- Gubashada iyo biyagelida
- Dhicida
- Dhaawaca fuulida gaariga

### Hubinta Amniga

- ✓ Xaqiiji in aad leedahay irid hoose iyo irida jaranjarnda.
- ✓ Ku xir daawada, kiimikada nadiifinta, iyo sumaha kale. Gurbood badan ayaa furi kara dhalooyinka leh habka adag in la furo.
- ✓ Ku rakib alaarmiga dabka (tijaabi bedelna batteriga 1da Abriil sanad walba).
- ✓ Hoos u dhig xaraarada biyaha kulul ee gurigaaga ilaa uu gaaro 50 degree Celsius.

### Tusayaasha Amniga

#### SARIIRTA JIIFKA

Ka hor inta aanay yeelan dherer ay ku fuuli karaan sariirta, ka kaxay ilmahaaga sariirta ilmaha una wareeji sariir caadi ah.

Ilmahaaga sahaydiisa jiiifka, oo ay ku jirto sariirto, ka fogay dariishada. Sidaas darteed, ilmahaagu ma woodi doono inuu fuullo sariirta oo ka dhaco dariishada.

Ku xir ilaaliyaha dariishada ilmahaaga dariishadiisa si aan ilmuhu uga dhicin. Ama adkay dariishadaa si aanay u furmin ka badan 10 sentimitir (4 inji). Shaashada daaquadu ka ilaalinmayso in ilmuhu aanu ka dhicin daaquadu.

#### JIKADA

Kiimiko badan oo wax lagu dhaqo iyo daawooyin ayaa sumayn kara ilmahaaga. Waxyaallahaas meel ku xir.

Ilmahaaga si nabad ah uga fogee haddii aad isticmaalayso waxyaalla sun ah.



Ku xafid fiilada korontada meel aan ilmuhu gaarin. Ha ogolaan inay ka lalmato miiska ama meel kale. Ilmahaagu waa soo dhifan karaa dabadeena waxaa ku daadan kara cunto kulul ama biya kulul. (sida kerliga wax lagu kariyo).

Cuntada adag ama ta ceeriinka ah u yaryaray sida khudaarta iyo furutka. Ha siin gurboodka miraha, nacnaca adag, saloolka, ama xanjada. Carruurta quudi markay fadhayaan, hana quudin markay soconayaan ama markay ordayaan. Taasi waxay ka ilaalinaysaa in ilmuhu wax jogsadaan.



Carruurtaada ka fogay markaad wax karinaysa ama samaynaysa wax kulul.

#### QOLKA QUBAYSKA

Ku xafid dhamaan daawooyinka iyo walxaha wax nadiifinta meel xiran.

Had iyo jeer kormeer ilmahaaga gurboodka ah. Ha u ogolaan carruurta korran inay kormeeraan gurboodkaaga. Waxa laga yaabaa in aanay ogayn sida looga dhigo gurboodkaaga aaman.

Isticmaal rabbarka qubayska ama kuwa aan ku dhegayn ee yaalla musqusha qubayska si loogu dhicin.

Hoos u dhig xaraarada biyaha kulul ee gurigaaga ugu badnaan 50 degree Celsius.

60 darajo oo nabar biyod ah in ka yar hal ilmiriqsi, 50 darajo waxay ku qaadanaysaa 5 daqiiqo. Tuubada biyaha kululi waa gubi kartaa gurboodkaaga.

## DIBAD AADIDA

Isticmaal xariga si aad cunugaaga ugu hayso tarooliga adeega. Sidoo kale u isticmaal xariga amniga kan ilmaha lagu qaado, kan lagu ordo ama sidoo kale baraam.

Had iyo jeer kormeer gurboodka ag jooga jidhaanta, harada biyaha, biyagaleenka iyo xeebta. Mar ha uga tegin ilmahaaga biyaha agtooda ama gudahooda.

## AMNIGA GAARIGA

Gurboodkaaga yari had iy jeer wuxuu u baahan yahay kursi lagu xiro. Marna ha ku qaban ilmaaga yar dhabtaada.

Marna ha dhigin kursiga gurboodka kursiga hore ee gaariga. Taasi weliba waa muhiim haddii gaarigaagu uu ku rakiban tahay boorsooyinka hawada.

Hubi inaad xaqiijiso in kursiga gaariga aad dooratay ku xirmaayo gaarigaaga ka hor inta aadan gadan.

Xaqiiji in ilmahaagu fadhiisto kursiga gadaale ee gaariga. Waa kan ,midka ugu aamisani.

## Rakibida ilmaha kursiga lagu xiro

Haddii aad u baahan tahay inaad ku rakibto kursiga ilmaha lagu rido ama talada kursiga ilmaha lagu xiro oo anfacaya gaarigaaga iyo baahida shakhsiyeed la xiriir Kidsafe WA tel: 1800 802 244 wixii macluumaada oo intaas ka badan.

## U doorida ilmahaaga kursiga gaariga:

Carruurta ka yar 8kg miisaan ahaan (qiyaas ahaana jira 6 bilood) iyo wixii ka weyn waxaad leedahay waxyaalla aad kala dooran karto:

- Kursi la bedbedeli karo (dhashay ilaa 18kg)
  - Horay u jeeda: 8 ilaa 18kg
- Kursiga gurboodka (8kg ilaa 18kg)
- Kuraas isku jirta (8 ilaa 26kg)
  - Gurboodka: 8 ilaa 18kg oo leh xarig gudaha ah
  - Booster Function: 18 ilaa 26kg oo leh xariga laabta ee suunka ama suunka amaanka.



Kursiga lagu xiro gurboodka - 8 ilaa 18 Kg  
Qiyaas ahaan 6 bilood ilaa 4 sanadood



Kan loogu daro gurboodka/xoojiyaha kursiga ilmaha 8 ilaa 18 Kg oo leh ilaaliyaha amniga, 18 ilaa 26 Kg kursi xoojiye ama ilaaliye ahaan  
Qiyaas ahaan 6 bilood ilaa 8 sanadood

## GURIGA AGAGAARKIISA

La soco walxaha ilmahaagu ku mergan karo. Gurboodku waxay jecel yihiin inay afkooda wax geliyaan. Qaar ka mid ah walxaha yaryar oo ilmaha laga fogeeyo:

- Furayaal
  - Buufino
  - Quruush
  - Tooyis leh qayba yaryar ama batteriyaal
- Cabitaanka kulul ka fogee ilmahaaga. Isticmaal koob leh dabool markaad cabayso wax kulul.

Ku samay irid jaranjarada hoosteeda iyo korkeeda labadaba.



## SOOGAABIN – DHAAWACA HEERKA KORITAANKA

Falalka Koritaanka	khatar/khatar la fili karo
Socodka, orodka	Shilka gaariga
Jecel yihiin in la cayrsado (18 ilaa 24 bilood)	Ku cararida wadada
Korida (miisaska noocay doonaan ka noqdeene)	burburinta (sumawga), dhicid, gubasho
Ka dabategida wax qarsoomay	burburinta (sumawga), qabsasho koronto
Ka wardoonid & madaxbanaani siyaada ah	Burburin (sumawga), gubasho, qarqid
Gelida meel walba sida (deyrka, garaashka)	Burburinta (sumawga)
Dabeecada iska dhigida	korida, raacida carruurta ka waaweyn, daawada la calinayo
Qaangaarnimo beena oo keenaysa kormeerid la'aanta waalidka	Dhamaan shilalka
Diidida in kursiga lagu xiro	Ilmaha kursi ku xirida – shilalka gaariga
Ku bilaabida cuntada dadka waaweyn	Rabitaan

## Macluumaad kale oo la heli karo

Macluumaad faahfaahsan oo intaas ka badan oo mawduucyada halkan lagu soo sheegay [www.kidsafewa.com.au](http://www.kidsafewa.com.au) ama la xiriir Kidsafe WA tel 1800 802 244 si aad u hesho macluumaad iyo talo mucayina.

### Kidsafe WA © 2007

Qayb ka mid ah ayaa la koobiyeyn karaa waxbarasho darteed. Ogolaansho ayaa looga baahan yahay si koobiyaysto xaashidaan dhamaanteed.

Macluumaad intaas ka badan ☎ (08) 9340 8509  
Khadka Macluumaadka ☎ 1800 802 244

Amniga Ilmaha  
Khadka Macluumaadka Sunta ☎ 13 11 26

[www.kidsafewa.com.au](http://www.kidsafewa.com.au)